

Ha ka maqnaan Kiridhityada Canshuurta La siiyo Qoyska leh Ilmo iyo Xubin Shaqaynaya!

Xitaa haddii aan lagaaga baahnayn inaad xerayso canshuur celinta dakhliga Minnesota, waxaad weli buuxin kartaa si aad u dalbato dheefaha canshuurta Minnesota. Kiridhitka Canshuurta Caruurta iyo Kiridhitka Xubin Qoyska u shaqeeya waxay cashuur dhaaf siyaan dadka dakhligoodu ka hooseeyo heer cayiman. Labada kiridhitba waa la soo celin karaa, taasoo la macno ah in laguu soo celin karo xitaa haddii canshuur aanan lagugu lahayn.

Waa maxay Kiridhitka Cashuurta Ilmaha?

Kiridhitka Canshuurta Ilmaha waxaa heli kara dadka reer Minnesota ee haysta carruur ka yar 18 jir. Markaad xerayso canshuur celinta Minnesota, waxaad u qalmi kartaa \$1,750 ilmo kasta iyada oo aan wax xadidaad ah saarnayn tirada carruurta.

Waa maxay Kiridhitka Xubin u shaqaynaya Qoyska?

Kiridhitka Xubinka u shaqaynaya Qoyska waxaa heli kara dadka reer Minnesota ee dakhli kasbaday sanadka dhexdiisa. Haddii dakhligaagu yahay \$8,750 ama ka badan, kiridhitkaaga ugu badan waa

- \$350 marka uusan jirin ilmo kugu tiirsan
- \$1,275 marka uu jiro hal ilmo oo kugu tiirsan oo da'diisa tahay 18 ama ka weyn
- \$2,450 marka uu jiro laba ilmo oo kugu tiirsan oo da'doodu tahay 18 ama wax ka weyn
- \$2,850 marka uu jiro saddex ilmo ama wax ka badan oo kugu tiirsan oo da'doodu tahay 18 ama ka weyn

Kiridhitka Ilmaha iyo Xubinka u shaqaynaya Qoyska labadaba meesha waa laga saaraa haddii dakhligaagu ka badan yahay \$29,500 (\$35,000 lamaanayaasha is qaba oo canshuurtooda si wada jir ah u xareysta). Kiridhitka ayaa hoos u dhacaysa 12% lacagta aad sameyso ama wadarta dakhliga aad haysato ka dib marka wax kasta laga jaro, hadba mid ka badan.

Sideen u sheegan karaa kiridhitkan?

Sannadaha cashuurta 2022 iyo ka hor, codso Kiridhitka Xubinka u shaqeeya Qoyska adoo isticmaalaya Jadwalka M1WFC, *Kiridhitka Xubinka u shaqeeya Qoyska*. Kiridhitka Canshuurta Ilmaha lama heli karo ilaa la gaaro sanadka canshuurta 2023.

Sannadaha cashuurta 2023 iyo wixii ka danbeeya, codso Kiridhitka Canshuurta Ilmaha iyo Xubinka u shaqeeya Qoyska labadaba adoo isticmaalaya Jadwalka M1CWFC, *Kiridhitka Ilmaha iyo Kiridhitka Xubinka u shaqeeya Qoyska ee Minnesota*.

Waxa kale oo aad u qalmi kartaa diyaarinta cashuur celinta bilaashka ah! Tag www.revenue.state.mn.us ku qor **diyaarinta cashuurta** bilaashka ah Sanduuqa Wax laga raadsado.